



## Buugga Xeerka iyo Nidaamka ee Waaxda Booliska Minneapolis

Tirada:  
8-300

### Cadadda Siddeedaad - Caruurta - Xeerarka ivo Nidaamvada

#### Nidaamyada Xiritaanka Carruurta

##### 8-306.01    Dhalinta Sarkhaansan iyo Dembiilayaasha Heerka Hoose ee Dhallinta ee u Baahan Feejignaan Caafimaad (10/07/08)

(A-D)

Dhallinta aan buuxin shuruudaha ballansashada JDC (tixraac qaybta 8-301 JDC Shuruudaha Booska) iyo dhallaanka u baahan daryeel caafimaad waxaa laga yaabaa in loo sii daayo waalidka/masuulka sharciga ah daawaynta ka dib haddii:

1. Dhallintu waa caddahay dammaanad-qaadid/ Dhalinyaro La Qabtay iyo amar-ku- hayn
2. Dhallinta si fiican ayaa loo aqoonsan karaa.
3. Dhallintu khatar uma aha nafteeda ama dadka kale.
4. Saraakiisha xira waxay helaan ogolaanshaha kormeeraha.
5. Saraakiisha soo xidhaya waxay ogaysiinayaan qaybta baadhista ee ku haboon, haddi ay khusayso/marka ay suurtogal tahay.

Saraakiishu waa inay dhamaystiraan warbixinta CAPRS ee tilmaamaysa in ilmaha loo keenay HCMC (ama cisbitaalka aagga kale) si loo qiimeeyo caafimaadka iyo in oggolaanshaha la siiyay xarunta caafimaadka si loogu sii daayo ilmaha waalidka/masuulka sharciga ah ka dib marka la dhammeeyo daaweynta. Saraakiisha loogama baahna inay la joogaan ilmaha ilaa waalidka/masuulka sharciga ahi yimaado.

Haddii ilmaha loo qaado Xarunta Kormeerka Dhallaanka (JSC) ka dib qiimeyn caafimaad ama daaweyn, foomamka siideynta caafimaad ee habboon (oo uu bixiyo isbitaalku) waa in ay raacaan dhallaanka marka isaga/iyada la dhigo JSC.

Haddii ay saraakiishu ogaadaan duruufaha hoose ee u baahan in ilmaha lagu geliyo haynta daryeelka 72-saacadood ee caafimaadka iyo daryeelka, saraakiishu waa in ay qabtaan si waafaqsan qaybta.

8-205 Haysashada Caafimaadka iyo Daryeelka - Dhallinta.

Dhammaan kiisaska, saraakiishu waa inay sameeyaan dadaal macquul ah si ay u helaan dhammaan dembiilayaasha gala sawiro lagana qaado faraha (tixraac qaybta 8-109 Faraha iyo Sawir-qaadista Carruurta).